# Barnaamijyada Cuntada iyo Lacagta Cadaanka ah ee Dadka aan Muwaadiniinta ahayn

Food and Cash Programs for Noncitizens

### Ma heli karaa cunto gargaar ama manfacyada kale ee ay dowladdu bixiso haddii aanan ahayn muwaadin Mareykan (US) ah?

Waxa jira barnaamijyo manfacyo dowladeed ah oo ka caawin kara dadka reer Minnesota cunto iyo lacag caddaan ah. Inaad heli kartid manfacyadaas iyo in kale adiga oo an muwaadin ahayn waxay ku xiran tahay martabadaada sharci iyo taariikhdii aad Maraykanka (U.S.) soo gashay.

## Barnaamijyadda Gargaarka Cuntada

### 1. SNAP – Barnamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada (Cunto Siin)

SNAP, oo horey loogu yeeri jiray Cunto Siin, waa barnaamij caawiya dadka danyarta ah iyo qoysasku inay cunto helaan.



### Ma heli karaa SNAP?

Si aad u hesho manfacyada SNAP, waa inaad tahay qof danyar ah. Waagii hore, haddii aadan ahayn muwaadin, caadiyan waxay ahayd inaad noqoto **"xaq u yeeshe" aan muwaadin ahayn**.

Taa macnaheedu waa:

- Aad haysato **sharci deganaansho ah (green card).** (Macnaha inaad sharci degaansho joogta ah leedahay ama haysto martabada LPR).
- Lagu siiyey **magangelyo.**
- Lagu fasaxay Mareykanka Maraykanka (U.S.) ugu yaraan sannad, iyo faxasaagii oo wali waqtgiisii dhicin.
- Aad leedahay ka reebid ama **baajin ah in wadanka lagaa saaro**.
- Aad haysato **Fiisaha T** (**T-visa)** ee la siiyo dhibanaayasha la tahriibiyo.
- Aad haysato **martabada muhaajirka** lagu tacadiyo.
- Aad tahay **qaxooti** ama laguula dhaqmo siddii **qaxooti** oo kale. Tan macnaheedu waa:
    - Muhaajir "Mareykan-aasiyaan ah" kaa oo aabihii uu ahaa muwaadin Mareykan ah (US) oo ku noolaa Bariga-Koonfureed ee Aasiya xilligii sannadihii Dagaalkii Fiitnaam.
    - Soo gale Kuubaan ama Haytiyaan ah
    - Muhaajir Gaarka ah ee Ciraaqi ama Afgaanistaanka ah

- Qof uu milaratiga Mareykanku (US) ka soo daad-gureeyey Afganistaan mudaddii u dhaxeysay 7/31/21 iyo 9/30/22 (ilaa iyo xabsi dowligu ka dhamaanayo)
- Ehel dhow la ah qof laga soo daad-gureeyey Afganistaan ee kor lagu xusay oo la saamaxay ka dib 9/30/22
- Qof ka soo jeeda wadanka Yukrayn oo la saamaxay mudaddii u dhaxeeysay 2/24/22 ilaa iyo 9/30/23
- Muwaadin ee "Compacts of Free Association." (waxaad ka Palau, Micronesia ama Marshall Islands).

**Laga bilaabo bisha Oktoobar 1, 2026,** xaq u yeeladka SNAP ee dadka aan muwaadinka ahayni waa uu isbedeli doonaa. Sidda ay dhigayso qeexida cusubi, **kaliya 3 nooc oo "xaqu yeeshe" aan muwaadin ahayn ayaa xaq u yeelan doona SNAP:**

1. Dadka aan muwaadinka ahayn ee deganaanshaha (green card) haysta. (Taa macnaheedu waa aad sharciyeysan tahay, waxa aadna leedahay deganaansho rasmi ah ama LPR.)
2. Dadka aan muwaadiniin ahayn oo ah "soo Galooti Kuban ama Haitiyan."
3. Dadka aan muwaadiniinta ahayn oo ah muwaadiniinta wadamadda "Cahdiga Xulafadda Xorta ah," ama COFA. Tan macnaheedu waa waxa aad u dhalatay mid ka mid ah wadamada Palau, Micronesia, ama Marshall Islands.)

**Sababta oo ah is-bedeladda sharciga, dadka badan oo aan muwaadiniin ahayn oo "xaq u lehe" ahaa ayaa waayi doona SNAP aan ka <u>ahayn</u> inay haystaan sharci rasmi ah (green card).**

## Ma inaan sugaa si aan u helo manfacyada SNAP?

**Ilaa laga gaarayo Oktoobar 1, 2026, qaar ka mid ah dadka aan muwaadiniinta ahayn waxaa laga yaabaa inay sugaan 5 sanno** laga bilaabo maalinta ay sharciga heleen si ay u helaan SNAP. Khasab **Ma'aha** inaad sugto 5-sanno hadii aad:

- qaxooti ama loola dhaqmo sidii yagoo qaxooti ah
  - Laguu ogolaaday sharci magangelyo
  - Laguu ogolaaday in lagaa reebo saarid
  - Halgamaa Mareykan ah (U.S.) ama ka tirsan ciidamada qalabka sida ee Maraykanka (U.S.)
- xilo ama ilmo yar oo u dhalay halgamaa ama qof ka tirsan hadda ciidamada qalabka sida ee Maraykanka (U.S.)
  - Uu yahay qof si sharci ah ku joogay Mareykanka (US) ilaa iyo Ogoosto 22, 1996, oo ay u xaqiijisay hay'adda Sooshal Sakuuratigu (Social Security) ama Gobolku inuu yahay qof naafo ah
- ka yar 18
- Uu yahay qof si sharci ah ku joogay Mareykanka (US) ilaa iyo Ogoosto 22, 1996 **AHAANA** 65 jir ama ka weynaa maalintaa
- Ah dadka Hmoongaha ama Buuralayda Lao (Highland Lao)

**Ka dib 10/1/26, ahaanta mid ka mid ah noocyadda kor ku xusan ma ay bixiso hubaal ah inaad heli karto SNAP**. Kaliya waxa aad heli doontaa SNAP haddii aad adigu:

1) haysato sharci deganaansho rasmi (green card)

2) aad tahay soo galooti “Kuban ama Haitiyan” ama “Cuban or Haitian entrant” ama
3) aad tahay muwaadin wadamadda COFA la yiraa (ee Palau, Micronesia, ama the Marshall Islands.)



## Waxaan Maraykan (U.S.) ku imi kafiil. Arrinnkaas ma dhib bay ku tahay helida manfaca SNAP?

Dadka Maraykan (U.S.) yimaada badankoodu waxa ay ku leeyihiin qof qaraabo ah Maraykanka (U.S.) oo kafiil qaada. Qofka qaraabada ah ee kafiilka ahi waa qof qoyska ka mid ah oo ah muwaadin ama haysta sharci deganaan rasmi ah (LPR). Kafiilku waxa uu ogolaadaa inuu mas’uul kaa noqdo adiga kolka aad Mareykanka (U.S.) timaado. Kafiilku wuxuu ka balan qaadaa hay’ada (USCIS) in hadii aad sabool noqoto, uu ku caawin doonaan adiga. Haddii qofka ehelkaaga ahi uusan haysan lacag ku filan si uu kafiil kaaga noqdo, qofkaa ehelka ahi waxay badan tahay inuu u baahdo inuu helo qof kale oo noqda “kafiil labaad.” Qofka kafiilka labaad ahi siddoo kale waa inuu ogolaado inuu dhaqaale ahaan ku gargaaro.

Haddii wadanka Mareykanka (US) aad soo gashay **ka dib bishii Deseembar 19, 1997** iyadoo kafiil uu ku keenay, dowladdu waxa waxa ay u xisaabin kartaa dakhliga iyo hantida qofka kafiilka ah ee ku keenay iyo waliba xilaha qofka ku keenay sidii dakhli iyo hanti aad adigu leedahay oo kale. Haddii aad leedahay kafiil labaad, dakhliga iyo hantidda kafiilkaaga labaad sidoo kale waxaa loo xisaabin siddii dakhligaaga iyo hantidaadda oo kale.

Dakhliga iyo hantida kafiilka wadanka ku keenay waa la xisaabin ilaa iyo inta aad ka noqonayso muwaadin Mareykan ah (US), kafiilka ku keenay uu ka dhimanayo ama uu si rasmi ah uga tagayo Mareykanka (US), ama aad adigu shaqeysay 10 sanno lagaana jaray canshuurta la yiraa (FICA) lacagtaada shaqada. Waxaa dhici karta in laguu xisaabiyo shaqada xilahaagu ama waalidkaa uu qabtay intii aadan wali qaan gaarin.

Kolka la xisaabiyo dakhliga iyo hantida kafiilkaaga waxaa dhici karta inay kor kaa mariso xadka dakhliga xaqqa loogu yeesho barnaamijka SNAP. Waxaa jira 2 waxyaabood oo laga reebay xisaabinta dakhliga iyo hantida kafiilka wadanka ku keenay:

a. <u>Saboolnimada:</u> Dakhliga iyo hantida kafiilka ku keenay lama xisaabinayo haddii aad cadeyn karto in cunto IYO hoy la’aani ay kugu dhacayso hadii dakhliga iyo hantida la xisaabiyo.

b. <u>Tacadi:</u> Dakhliga iyo hantida kafiilka ku keenay lama xisaabinayo haddii aad cadeyn karto in adiga iyo ilmahaagu aad la kulanteen tacadi iyo cadownimo aad u ba’an oo uu idiin geystay qofka idiin keenay ama waalid. Aadana la noolaan karin tacadi gaystaha mar dambe. Waa khasab inaad cadeyso inaad ugu baahan tahay gargaarka SNAP tacadiga awgii.

**Ogow:** Dakhliga iyo Hantida kafiilka ku keenay **LAGUMA DARO XISAABTA ILMAHA** kolka ay qaataan barnaamijka nafaqada SNAP.

**Ogow:** Barnaamijka SNAP, dowladdu waxa ay eegtaa kafiilka ku keenay baaxada qoyskiisa iyo amaahda go'an ee lagu leeyahay kolka uu go'aansanayo inta ay tahay inta laga xisaabinayo dakhliga iyo hantida qofka ku keenay.

## Ma inaan shaqeeyaa si aad u helo SNAP?

Haddii ay da'daaddu u dhaxeyso 18 ilaa iyo 64 jir aadana haysan ilmo yaryar (ama aad haysato ilmo, laakiin ilmahaaga kan ugu yari uu jiro ugu yaraan 14), waa laga yaabaa inaad u baahato inaad shaqeyso si aad u hesho SNAP. Haddii lagaa rabo inaad shaqeyso, aadana shaqeyn, waxa aad heli kartaa SNAP kaliya uun 3-bilood 3-dii-sannadba.

## 2. (MFAP) – Barnaamijka Gargaarka Cuntada ee Minnesota

MFAP waxay ka caawisaa waayeelka aan muwaadiniinta ahayn ee jooga Minnesota gadashada cuntada. Waxayna u hogaansantaa xeerarka SNAP. Waa khasab inaad jirto ugu yaraan **50**-sanno.

## Ma heli karaa MFAP?

Hadii aadan xaq u lahayn SNAP sharcigaaga wadanka aad ku leedahay awgii, ama aad sugaysay 5 sano helida manfacyada SNAP, waxa dhici karta inaad xaq u yeelato inaad hesho MFAP. Waa inaad **si sharci ah ugu nooshahay** Mareykanka **(**U.S.) Laakiin khasab ma aha inaad noqoto "xaq u lehe" aan muwaadin ahayn.

Waa inaad ka soo baxdaa shuruudaha dakhliga iyo hantida ee SNAP si aad u hesho MFAP ka. Taas macnaheedu waa hadii aadan xaq u lahayn SNAP dakhliga kafiilka oo la xisaabiyey awgii, ma heli karaysid MFAP, iyana. Isla labadii waxyaabood ee la reebay ee ku saabsanaa saboolnimada iyo tacadiga ayaa quseeya MFAP kana.

## MFAP iyo Muwaadinimo

Hadii aad codsato MFAP aadna leedahay sharci degnaansho oo Rasmi ah (aad haysato green card), waa inaad qaadaa "talaabooyin" aad ku raadsanayso muwaadinimo. Kuwaan waxa loo xisaabiyaa qaadista "talaabooyin":

- Qaadasho cashar muwaadinimo, akhris-qoris, Ingiriis sidii af labaad (ESL). Waa la xisaabin hadii aad ku jirto liiska sugista fasallada ESL ama fasalada far barashada. looma xisaabiyo inay tahay siddii liis sugid ee fasallada qaadashada muwaadinimada.

- Aad leedahay codsi-dalab muwaadinimo oo ka diiwaangashan hay'ada USCIS iyo inaad sugayso imtixaan ama waqtiga dhaarinta. Ama aad codsatay in lagaa daayo imtixaanka shuruudihiisa.

- Aad ku dhacday imtixaanka muwaadinimada 2 mar ama aadan fahmi Karin xuquuqda iyo mas'uuliyada muwaadinimada Maraykanka (U.S) ah.

Khasab ma aha inaad qaado wax talaabooyin ah hadii aad tahay:

- aad si sharci ah ugu noolayd Mareykanka (U.S.) muddo ka yar 4-sanno,
- aad tahay 70 jir ama aad ka wayn, ama
- Aad ku nooshahay xarun kalkaaliso, guri kooxeed, ama meel kale oo la mid ah.



## Manfaca MFAP iyo Shaqooyinka

Haddii aad u dhaxayso da'aha 50 ilaa iyo 64 aadana haysan ilmo yaryar, ama aad haysato ilmahaaga ugu yarina uu jiro ugu yaraan 14, waa inaad shaqeyso si aad u hesho manfaca MFAP waqti ka badan 3 bilood sanadkii. Ma jiraan wax ka reebitaano ahi. La tasho qareen haddii aad su'aalo qabtid.

## Barnaamijyada Gargaarka ee Lacagta Cadaanka ah

1. **Lacagta Cadaanka ah ee Qoyska:**
   **MFIP (Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee MN)**
   **FSS** (Adeegyada Xasilinta Qoyska)

**Ogow:** SSI laguma soo darin halkan. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *SSI ga Dadka Aan Muwaadiniinta Ahayn*.

### Ma u heli karaa manfacyada lacagta cadaanka ah qoyskayga?

Waa aad heli kartaa manfacyada MFIP ama FSS hadii aad ugu nooshahay Mareykanka (US) si rasmi ah. Tusaale ahaan, waa heli kartaa manfacyadaa hadii:

- Aad tahay Degane ku meel gaar ah oo Sharciyeysan?
- Aad haysato martabada Ilaalinta ku Meel gaarka ah (TPS)
- Aad leedahay codsi magangelyo oo kuu xareysan
- Aad tahay xilo ama ilmo muwaadin Maraykan (U.S.) ah aadna haysato fiiso la ansaxiyey iyo codsi wali hawshiisii socoto oo aad ku heli martabada deganaanshada rasmiga (LPR),
- Laguu ogolaaday sii deyn ku salaysan bini'aadanimo,
- Dib lagaa Dhigay Bixid Khasab ah (DED) ama martabada dhib uga dhigada fal, ama ka deyn masaafurin ama
- Aad haysato martabada DACA
- Haysata Fiisaha-U  (U-Visa)
- Aad haysato sharci kale oo sax ah.

Waayo xeerka oo wax laga bedelay bishii Maarso 2024, awgii hadda waa aad heli kartaa manfacyadda lacagta cadaanka ah haddii sharciga wadanka aad ku joogtaa uu ku salaysan yahay Fiisaha U (U-Visa).

Hadii aad joogtay in ka yar sannad Maraykanka (U.S.), waxaa durbadiiba aad gali barnaamijka FSS intii aad geli lahayd barnaamijyada MFIP.

## Ma inaan sugaa helida manfacyada?

Ma jiraan wax ah muddo sugitaan ee barnaamjiyada MFIP ama FSS.

## Waxa aan imid wadanka Mareykanka (U.S.) iyadoo kafiil la iga yahay. Arrintani ma quseeysaa helida barnaamijyada MFIP ama FSS ka?

Hadii aad ku timid Maraykanka (U.S.) ka dib 12/18/1997 dacwo uu qof aad qaraabo tihiini uu kuu dacawooday, dowladu waxay u xisaabin kartaa dakhliga iyo hantida kafiilkaaga iyo kuwa xilaha kafiilkaaga sidii dakhli ama hanti aad adigu leedahay oo kale. Dowladdu waxay kaloo xisaabin kartaa dakhliga iyo hantidda kafiilkaaga labaad. Dakhliga iyo hantida kafiilka labaad waa la xisaabin ilaa inta aad ka noqonayso muwaadin Mareykan ah (US), qofka kafiilka kaa ahi uu ka geeriyoodo ama uu si rasmi ah uga tago wadanka Mareykanka (U.S.) ama aad shaqeysay muddo 10 sanno ah lagana jarayey canshuurta (FICA) lacagtaada. Waxaa dhici karta in laguu xisaabiyo shaqada xilahaagu ama waalidkaa uu qabtay intii aadan wali qaan gaarin.




Kolka la xisaabiyo dakhliga iyo hantida kafiilkaaga waxaa dhici karta inay kor kaa mariyaan xadka dakhliga xaqqa loogu yeesho barnaamijka lacagta cadaanka ah. Waxaa jira 2 waxyaabood oo laga reebo xisaabta dakhliga kafiilka Waxa jira labo laga reebo si loo xisaabiyo daqliga kafiilka. Waxayna la mid yihiin ka reebitaanada kor ku xusan ee hoos yimaada qaybta, *"waxaan ku imid Mareykanka (U.S.) kafiil. Arrintaasi ma quseeysaa helida SNAP?"*

Waxa jira xeer 3-sanno ah oo gaar ah oo quseeya dadka ku jooga Mareykanka (U.S.) fiisaha kala duwanaanta dadka. Waad heli manfacyada hadii aad ku guulaysatay fiisaha baqtiyaanasiibka ah. Hadii aad haysato fiisaha kala duwanaanta dadka, waxaa dhici karta in qaar ka mid ah dakhliga kafiilkaaga loo xisaabiyo sidii dakhli aad adigu leedahaya oo kale. Laakiin in yar oo ka mida ayaa la xisaabin hadii aad ku timid Mareykanka (U.S) dacwo qaraabo kuu xaraysay. Kolka la xisaabiyo dakhliga iyo hantida kafiilkaaga waxaa dhici karta inay kor kaa mariyaan xadka dakhliga xaqqa loogu yeesho barnaamijyada MFIP, DWP iyo FSS.

## MFIP, FSS iyo Muwaadinimada

Hadii aadan ahayn "xaq u yeeshe" aan muwaadin ahayn, laakiin aad tahay qof Degaansho sharci ah oo Rasmi ah haysta (aad haysato green card), isla "talaabooyinkii" aad u qaaday helida MFAP (kor) ayaa ku quseeyn adiga sida aad u hesho manfacyada MFIP iyo FSS.

## Ma waxaa jira shaqo la iska doonayo?



Hadii aad qaadato manfacyada lacagta cadaanka ah ee qoyska, waa inaad shaqo raadisaa ama shaqo heshaa. Waxaa iyana dhici karta inaad awoodo in lagu xisaabiyo fasalada ESL ka ah waqtiga loo qorsheeyey shaqo raadinta iyo qorshaha shaqada.

1. **Aan ahayn lacagta Cadaanka ah ee Qoyska:**
   **GA** (Kaalmada Guud)
   **MSA** (Gargaarka Kabida ah Minnesota)

## Kaalmada Guud - GA

Isla xadidaadihii laanta socdaalka ee barnaamijka MFAP ayaa quseeya iyana barnaamijka GA:

- Waxa dhici karta in aad hesho GA hadii aad tahay qof **"si sharci ah ugu nool" iyo Rasmi ahba** Mareykanka (U.S.), xataa hadii aadan ahayn "xaq u yeeshe" aan muwaadin ahayn.
- Waa inaad qaado "talaabooyin" ku saabsan noqoshada muwaadin
- Waxa dhici karta xisaabinta dakliga kafiilkaaga inay kaa dhigto qof aan xaq u lahayn, aan ka hayn inaad ka soo bixi karto mid ka mid ah 2 da waxyaabood ee laga reebay.

## Taakuleynta Kabida ah ee Minnesota - MSA

MSA waxa loogu talo galay dadka hela SSI ama manfacyada naafada la siiyo ee Sooshal Sakuuratiga (Social Security). Xeerarka laanta socdaalka ee quseeya barnaamijka MSA waa kuwo la mid ah kuwa barnaamijka (SSI). Eeg warqada xogta aruursan ee *SSI ga Dadka Aan Muwaadiniinta Ahayn*.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**